

**SOMALI TRANSLATION of the Department for Education statutory guidance for schools and colleges:**

**Keeping children safe in education 2021**

**Part one: Information for all school and college staff**

**September 2021**

Find KCSIE Part 1 and also Annex A translated into 12 community languages at [kcsietranslate.lgfl.net](https://kcsietranslate.lgfl.net)

NB this translation goes up to and includes the diagram on page 20 on the original.



Department  
for Education

# **Dhawrista badqabka carruurta waxbarashada ku jirta 2021**

**Tusmada sharciga ah ee dugsiyada iyo kuleejyada**

**Qaybta Koobaad: Macluumaadka dhamaan  
shaqaalaha dugsiya iyo kuleejka**

**Sebteembar 2021**

# Mawduucyada

Faahfaahin kooban	3
Xog ku saabsan tasmadaan	3
Qaybta Koobaad: Macluumaadka ilaalinta ee dhamaan shaqaalaha	4
Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ay ogaadaan ayna sameeyaan	4
Waxa ay samaynayaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku haday walaacyo kaqabaan ilmo	14
Waxa ay tahay inay sameeyaan shaqaalaha dugsiga ama kuleejka haday walaacyo kaqabaan xeerarka ilaalinta caruurta ee kajira dugsiga ama kuleejka	18

## Faahfaahin kooban

Dhawrista badqabka varruurta waxbarashada ku jirta waa tasmada aasaasiga ah ee laga doonaayo dugsida iyo kuleejyada ku yaala wadanka Ingiriiska inay raacaan marka ay fulinayaan waajibaadkooda ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta.

Waa muhiim in **qof kasta** oo ka shaqaynaaya dugsi ama kuleej uu fahmo waajibaadka ka saaran ilaalinta carruurta. Shaqsiyaadka maamulka iyo mulkiilayaasha xarumuhu waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha sida tooska ah ula shaqaynaaya carruurta ay akhriyaan ugu yaraan hal qayb oo kamid ah tasmada.

Shaqsiyaadka maamulka iyo mulkiilayaasha, la shaqaynaaya kooxahooda maamulka sare si gaar ahna hogaankooda ilaalinta badqabka, waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha aan tooska ula shaqaynayn carruurta ay akhriyaan midkood Qaybta koobaad ama araca A (qaybta lasoo koobay ee Qaybta koobaad) ee nuqulka buuxa ee dukumiintiga. Tani waa gabi ahaanba arin u taala dugsiga ama kuleejka waxaana lagu salayn doonaa qiimayntooda ku aadan tasmada waxtarka ugu badan u leh shaqaalahooda si ay u ilaaliyaan una hormariyaan faya dhawrka carruurta.

Nuqulka buuxa ee KCSIE waxaa laga heli karaa halkaan: [Keeping children safe in education \(Dhawrista badqabka carruurta waxbarashada ku jira\) - GOV.UK \(www.gov.uk\)](https://www.gov.uk/government/consultations/keeping-children-safe-in-education)

## Xog ku saabsan tasmadaan

Waxaan adeegsanaa erayga “**waa qasab**” iyo “**waa in**” dhammaan intaan wadno tasmadaan. Waxaan u adeegsanaa erayga “**waa qasab**” marka qofka laga hadlaayo sharciyan laga doonaayo inuu wax sameeyo halka erayga “**waa in**” aan adeegsan marka qayb talo ay ah tahay in la raaco ilaa inay jirto maahee sabab macquul ah oo diidaysa.

# Qaybta Koobaad: Macluumaadka ilaalinta ee dhamaan shaqaalaha

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ay ogaadaan ayna sameeyaan

### Hanaan diirada saaraaya caruurta iyo wada shaqaynta si loo ilaaliyo nabad galyadooda

1. Dugsiyada iyo kuleejyada iyo shaqaalahoodu waxay qayb muhiim ah kayihiin hanaanka balaaran ee ilaalinta badqabka caruurta. Hanaankaan waxaa lagu qeexay tasmada sharciga ah Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta).
2. Ilaalinta iyo hormarinta fbadqabka caruurta ayaa ah masuuliyad qof kasta saaran. Qofkasta oo lajooga caruurta iyo qoysaskooda wuxuu leeyahay door uu ciyaaro. Si aan ubuuxino masuuliyada nasaaran si waxtar leh, dhamaan dhinacyada ay qusayso waa inay hanaankooda kadhigaan mid diirada saaraaya caruurta. Tani waxay kadhigan tahay inay kafakaraan, markasta, waxa ay tahay maslaxada ugu fiican ee ilmaha.
3. Majiro adeeg sameeya kaliya oo haysan kara sawirka baahiyaha buuxa ee ilmaha iyo xaaladaha uu kujiro. Hadii caruurta iyo qoysasku helayaan caawimaada saxda ah xiliga saxda ah, qof kasta oo lakulma ayaga wuxuu door kuleeyahay aqoonsiga walaacyada ay qabaan, uu lawadaago macluumaad uuna qaado talaabo degdeg ah.
4. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka caruurta waxaa lagu qeexaa marka aga fiirsho ujeedooyinka tasmadaan:
  - in laga difaaco caruurta dhibaato lagula kaco;
  - in laga hortago in caafimaadka dhimirka iyo kan jireed ee carruurta ama kobaca ilmaha dhaawac gaaro;
  - Xaqiijinta in caruurta ay ku koraan xaalado waafaqsan bixinta daryeel badqab iyo waxtar leh; iyo
  - qaadista talaabo si loogu sahlo in dhamaan caruurta helaan natiijooyinka ugu fiican.
5. Caruurta waxaa kujira qofkasta oo kayar da'da 18 sano.

### Doorka shaqaalaha dugsiga iyo kuleejka

6. Shaaalaha dugsiga iyo kuleejku si gaar ah ayay muhiim uyihiin maadaama ay leeyihiin awood ay ku aqoonsadaan walaaca ilmaha xili hore, inay kor u qaadaan faya qabka carruurta iyo inay siin karaan caruurta caawimaad, ayna kahortagi karan in walaaca ay caruurta qabaan kasi daro.
7. Dhamaan shaqaalaha waxaa saaran masuuliyad ah inay siiyaan caruurta goob amaan ah oo ay wax kubartaan.

8. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay diyaar u ahaadaan aqoonsiga caruurta kafaadayaysan karaan caawimaad hore.<sup>1</sup> Caawimaad hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla marka dhibaataadu timaado xili kasta oo kamid ah nololsha ilmaha, lagasoo bilaabo sanadaha ay saqiirka yihiin ilaa markay gaaraan dhawr iyo toban jiro.

9. **Xubin kasta oo kamid ah shaqaalaha oo wax** walaac kaqaba badqabka ilmaha waa inuu raacaan hanaanka kuqoran farqadaha 55-70. Shaqaaluhu waa inuu diyaar u ahaadaa kataageerista shaqaalaha arimaha bulshada iyo wakaaladaha kale iyaga raacaaya wargalinkasta.

10. Dugsi kasta iyo kuleej kasta waa inuu lahaadaa hogaan wax badbaadinaaya kaasoo siinaaya taageero shaqaalaha si ay uqabsadaan waajibaadkooda ilaalinta caruurta kuwaasoo sidoo kale si dhaw ula shaqaynaaya adeegyada kale sida daryeelka bulshada ee caruurta.

11. Hogaanka badbaadinta ee shaqada loo magacaabay (iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah) waxay ubadan yihiin inay haystaan sawirka dhamaystiran ee ilaalinta ilmaha uuna noqdo hogaanku qofka ugu haboon ee katalo bixinaaya jawaabta laga bixinaayo walaacyada dhanka amaanka.

12. Heerka udagsan Macalinka ee 2012 ayaa dhigaaya in macalimiinta (kuwaasoo ay kujiraan hogaanka macalimiintu) laga rabo inay ilaaliyaan faya dhawrka caruurta ayna joogteeyaan kalsoonida dad waynuhu kuqabaan xirfada macalinimada taasoo qayb ka ah waajibaadkooda xirfadeed.<sup>2</sup>

## **Waxa ay shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ubaahan yihiin inay ogaadaan**

13. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay ogaadaan hanaanada kajira dugsiyadooda ama kuleejkooda kuwaasoo taageeraaya ilaalinta ilmaha waana in hanaanadaan loo sharaxaa macalimiinta ayadoo lagu daraayo hanaanka shaqo barista macalimiinta. Waa inay hanaanka kujiraan:

- xeerka difaaca carruurta, kaasoo qayb ka ah waxyaabaha kale oo ay sidoo kale ku jiraan xeerka iyo habraacyada xal u helida xadgudubka carruurta isku gaystaan;
- Xeerka habdhaqanka (kaasoo ay ku jiraan talaabooyinka looga hortagaayo xoog sheegashada, ayna ku jirto hanjabaadaha la isku mariyo interneedka, xad gudubka ku salaysan fikirka qaldan iyo takoorka);<sup>3</sup>
- xeerka habdhaqanka shaqaalaha (kaasoo mararka qaar loo yaqaano xeerka anshaxa);
- jawaabta sugista amaanka caruurta waxbarashada kamaqan; iyo
- doorka hogaamiyaha loo magacaabay ilaalinta amaanka (ayna kujiraan aqoonsiga hogaanka loo magacaabay ilaalinta caruurta iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah).

---

<sup>1</sup> Macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan caafimaada hore waxaad kaheli kartaa Cutubka 1 ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#).

<sup>2</sup> The [Teachers' Standards \(Heerarka Udagsan Macalinku\)](#) waxay qabanayaan: dadka lababarayo ee baranaaya QTS; dhamaan macalimiinta dhamaysanaaya mudadooda sharciga ah ee barashada goobta shaqada (macalimiinta dhawaan bartay xirfada [NQTs]); macalimiinta dhiga dugsiyada dawlada, ayna kujiraan dugsiyada sida gaarka ah loo maamulo, kuwaasoo ay qabanayaan Sharciyada Waxbarashada (Qiimaynta Macalimiinta Dugsiga) (England) 2012.

<sup>3</sup> Dhamaan dugsiyada waxaa laga doonayaa inay lahaadaan xeerka habdhaqanka (macluumaadka oo faahfaahsan ayaa kahelaysa here (halkaan). Hadii kuleej uu ubaahdo inuu dagsado xeerka habdhaqanka waa in loosheegaa shaqaalaha sida kor kuqeexan.

Koobiyada xeerarka iyo koobiga Qaybta koobaad (ama Faraca A, hadduu haboon yahay) ee dukumiintiga buuxa waa in lasiiyaa **dhammaan** shaqaalaha marka shaqada latusaayo.

14. **Dhamaan** shaqaalaha waa in lasiyaa tababarka ilaalinta iyo difaaca caruurta oo sax ah (ayna ku jirto badqabka oonleenka) markay shaqada bilaabayaan. Tababarka waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa. Waxaa intaa sii dheer, dhamaan shaqaalaha waa in lasiiyaa macluumaadka soo kordha ee laxariira ilaalinta iyo difaaca caruurta (ayna ku jirto badqabka oonleenka) (tusaale ahaan, in loogu diro iimeelka, lagu siiyo tilmaamaha oonleenka ah iyo kulanada shaqaalaha), sida loo baahdo, iyo uu yaraan halmar sanadkii, si ay uhelaan xirfado iyo aqoon kuhaboon ilaalinta badqabka caruurta si wax ku ool ah.

15. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay kawarqabaan hanaankooda maxaliga ah e caawimaada<sup>4</sup> xiliga hore ayna fahmaan doorka ay kuleeyihiin arintaas.

16. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay ogyihiin hanaanka loo sameeyo wargalinada lasiinaayo daryeelka arimaha bulshada ee caruurta iyo qiimaynada waajibka ah ee Sharciga Caruurta 1989, gaar ahaana farqadiisa 17 (caruurta baahida qaba) iyo farqadiisa 47 (ilmo la ildaran, ama ay ubadan tahay inuu ladhibaatoonaayo, khatar wayn oo kudhacday) taasoo mari karta hanaanka wargalinta, ayna lasocoto doorka ay filayaan inay kaciyaaraan qiimaynada noocaas ah.<sup>5</sup>

17. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay ogyihiin waxa ay samaynayaan hadii iloo uu usheego in xadgudub, la sasabtay ama daycaad loo gaystay. Shaqaaluhu waa inay yaqaanaan sida ay umaaraynayaan shardiga ilaalinta heerka qarsoodinimada macluumaadka ee saxda ah. Tani waxay kadhigan tahay in arinta ogaysiiyaan kaliya shaqsiyaadka ubaahan inay ogaadaan, sida hogaanka uxilsaaran badqabka caruurta (ama kuxigeenka) iyo daryeelka arimaha bulshada ee caruurta. Shaqaaluhu waa inaysan marna ilmaha ubalan qaadin inaysan cidna usheegi doonin warbixintiisa nooc kasta oo xadgudubka ah, maadaama aysan arintaani ugu danbayn noqon doonin maslaxada ugu haboon ee ilmaha.

18. Dhammaan shaqaaluhu waa inay awoodaan u xaqiijinta dhibanayaasha in cabashadooda si adag oo baaraayo lana siin doono taageero iyo badqab. Dhibanaha waa inaan marna la siin dareen ah inay abuurayaan dhibaato markay soo sheegaan xadgudub, rabshad galmo ama dhibaataayn galmo. Mana ahan in dhibane marna la dareensiyo inuu dareemo ceeb markuu soo sheego xadgudubka.

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku ay raadiyaan

### Caawimaad hore

19. **Ilmo** kasta ayaa kafaafiidi kara caawimaad hore, laakiin dhamaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku waa inay si gaar ah uga feejignaadaan baahida imaan karta ee laxariirta in caawimaad hore lasiiyo ilmaha:

- Naafada ah ama qaba xanuuno caafimaad qabana baahiyo gaar ah oo dheeraad ah;

---

<sup>4</sup> Macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan caafimaada hore waxaad kaheli kartaa Cutubka 1 ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#)

<sup>5</sup> Xog faahfaahin dheeraad ah ka bixinaysa imtaxaanaadka sharciga ah ayaa laga heli karaa Cutubka 1 ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#).

- kaasoo qaba baahiyo dhanka waxbarashada gaarka ah (ayadoon laga fiirin inuu leeyahay Waxbarasho sharciga kuqeexan, Caymis Daryeel ama Caafimaad);
- Qaba baahida caafimaadka dhimirka;
- ilmo ah daryeele da'yar;
- leh astaamo muujinaaya in uu dhexda uga jiro habdhaqan kabaxsan arimaha bulshada ama danbi, ayna kujiraan kamid ahaanshaha koox burcad ah iyo urur ay leeyihiin kooxo danbiyo abaabulan fuliya ama laymanka degmada;
- uu yahay mid si joogto ah umaqan/umaqnaada xiliyada laga rabo goobta daryeelka ama guriga;
- uu halis ugu jiro adoonsiga casriga ah, tahriibin dad ama in looga faa'iidayso fal galmo ah ama danbi ah;
- halis ugu jira in fikir khaldan lagu shubo ama maskaxda laga xado;
- Xubin kamid ah qoyskiisu ku jiro xabsiga, ama dhibaato kasoo gaartay xadgudub waalidku gaystay;
- uu kujiro xaalad dhanka qoyska ah oo caqabado kuhor gudbaysa ilmaha, sida adeegsiga daroogada ama khamriga, arimaha caafimaadka dhimirka ee qof wayn iyo xadgudubka kadhaca qoyska;
- uu yahay ilmo daroogo caba ama khamriga caba qudhiisu;
- kaasoo ah mid kusoo laabtay gurigooda kana yihiin xarunta daryeelka;
- Uu khatar ugu jiro xadgudub ku salaysan 'sharaf dhawr' sida Gudniinka Fircooniga ah ama Guur Qasab ah;
- uu yahay ilmo si gaar ah qof uu u korsaday; iyo
- Uu si joogto ah uga maqan yahay waxbarashada, ayna ku jiraan maqnaanshiyaasha joogtada ah ee qayb kamid ah maalinta dugsiga.

## Xadgudubka iyo dayacaada

20. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay ka warqabaan astaamaha muujinaaya xadgudubka iyo dayacaada. Ogaanshaha waxa aad raadinayso ayaa muhiim u ah aqoonsiga xili hore ee xadgudubka iyo dayacaada (ka fiiri farqadaha 26-30) iyo xaaladaha gaarka ah ee ilaalinta badqabka sida ilmo loo adeegsaday fal danbiyeed ama fal galmo ah (ka fiiri farqadaha 32-39) si shaqaaluhu awood ugu yeeshaan aqoonsiga kiisaska carruurta u baahan karta caawimaad ama difaac.

21. Hadii aan shaqaaluhu hubin, waa inay **markasta** waydiiyaan hogaamiyaha uxilsaaran ilaalinta caruurta ama ku xigeenkiisa.

22. **Dhamaan** shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku waa inay ogaadaan in arimaha xadgudubka, dayacaada iyo ilaalinta ilmuhu ay yihiin dhacdooyin keli ah aynsan kuligood lagu koobi karin hal qeexitaan ama calaamad. Inta badan, cilado badan ayaa isku xirma, sidaas awgeed shaqaaluhu waa in markasta feejignaadaan ayna markasta usoo gudbiyaan walaacyadooda hogaamiyaha qaabilsan ilaalinta badqabka (ama ku xigeenkiisa).

23. **Shaqaalaha** oo dhan waa inay ogaadaan dhacdooyinka iyo/ama habdhaqanada ilmaha laga ilaalinaayo ayaa laxariiri kara arimo kabaxsan dugsiga ama kuleejka iyo/ama waxay kadhax dhici karaan caruurta oo jooga meel kabaxsan goobahaan.

**Dhammaan** shaqaalaha, laakiin si gaar ah hogaanka u xilsaaran badbaadada (iyo ku xigeenadooda) waa inay ka fiirsadaan in carruurta khatar ugu jiraan xadgudub ama ka faa'iidaysi lagu sameeyo intay ku jiraan xaaladaha ka baxsan qoysaskooda. Dhibaatooyinka dheeraadka ah ee qoyska ayaa leh qaabab kaladuwan carruurta ayaana khatar u geli kara dhibaatooyin badan ayna ku jiraan (laakiin aan ku koobnayn) ka faa'iidaysi dhanka galmada ah, u adeegsiga fal danbiyeed, xadgudub galmo, rabshada dhalinta oo aad u xun iyo laymanka degmada.

24. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay la socdaan in tignooloojiyadu ay qayb wayn ka tahay ilaalinada badan ee badqabka iyo faya dhawrka. Carruurta ayaa khatar ugu jira xadgudubka oonleenka iyo sidoo kale kan fool-ka foolka ah. Marar badan xadgudubka ayaa lagu sameeyaa qaababka oonleenka ah iyo kuwa tooska ah si wadajir ah. Carruurta ayaa sidoo kale xadgudub u gaysan kara ilmaha facood ah ee ku jira baraha oonleenka ah, tan ayaa noqon karta fariimo xadgudub ah, dhibaatayn ah, iyo kuwo haweenka lagu bahdilaayo, wadaagista aan la ogolaan ee sawirada anshax xumada ah, gaar ahaana kooxaha wada sheekaysiga, iyo wadaagista sawirada cayda iyo galmada ah, loona diro dadka aan doonayn in sawiro noocaas ah loosoo diro.

25. Markasta, hadii aan shaqaaluhu hubin, waa inay markasta waydiiyaan hogaamiyaha uxilsaaran ilaalinta caruurta (ama kuxigeenkiisa).

### **Astaamaha muujinaaya xadgudubka iyo dayacaada**

26. **Xadgudub:** waa nooc kamid ah si xun ula dhaqanka ilmaha. Qof ayaa kuxadgudbi kara ilmo ama dayici kara asagoo usababaaya khatar ilmaha kudhacda ama kufashilmaaya talaabadii uu uga difaaci lahaa khatarta. Caruurta waxaa xad gudub loogu gaysan karaa qoys ama xarun waxbarasho ama xarun bulsho waxaana kuxad gudbi kara dadka ilmuhu yaqaanaan ama, marar dhif ah, dad kale. Xad gudubka ayaa kadhici kara gabi ahaanba khadka oonleenka, ama farsamada casriga ah ayaa loo adeegsan karaa fududaynta xad gudub aan oonleen ahayn. Caruurta waxaa ku xadgudbi kara qof wayn ama dad waawayn ama ilmo kale ama caruur kale.

27. **Xad gudubka jirka ah:** waa nooc kamid ah xad gudubka kaasoo ay kujiri karaan nabar kudhufasho, hantaaturayn, tuuris, sumayn, gubid ama wax kulul uridis, biyo kuquusin, naqas kudhajin ama hadii kale dhibaato loo gaysto jirka ilmaha. Dhibaataaynta jirka ayaa sidoo kale imaan karta marka waalid ama qof daryeele ah uu buunbuuniyo, ama si kas ah ugu rido, xanun ilmaha.

28. **Xad gudubka dareenka:** niyad kadilka ilmaha ee joogtada ah sida in lagu abuurto saamayno daran oo xun kobaca dareen ee ilmaha. Waxaa kujiri kara in ilmaha loogu celceliyo inuu uahay mid nacas ah ama aan cidna jeclayn, aan wax kutoornayn, ama kaliya ay qiimo uleeyihiin sabab laxariirta inay baahida qofkale buuxshaan. Waxaa kujiri kara inaan ilmaha lasiin fursado uu ku sheego waxa uu dareemaayo, in si gardaro ah looga xiro hadalka ama 'lagu shactiraysto' waxa uu sheego ama sida uu uhadlo. Waxaa kujiri kara in himilooyin aan kuhaboonayn da'da ama heerka kobaca ee ilmaha kuwaasoo lagu tartarsiiyo caruurta. Waxaa kuwaan kamid noqon kara isdhexgal uusan ilmuhu gaarin marka laga fiirsho awoodiisa kobac iyo sidoo kale difaac xad dhaaf ah iyo in laxakameeyo waxyaabaha ay daawan karaan iyo waxbarashadooda, ama il ilmaha laga hor istaago kaqaybgalka isdhexgalada caadiga ah ee bulshada. Waxaa kujiri kara araga ama maqalka sida xun ee loola dhaqmay ilmo kale. Waxay noqon kartaa xoog usheegasho daran (ayna kujirto hanjabaada laysku mariyo internetka) taasoo kenaysa in caruurta si joogto ah udareemaan cabsi ama inay halis kujiraan, ama in lasasabto ama lakhiyaano caruurta. Qaar kamid ah heerka xad gudubka dareenka ayaa laxariira dhamaan noocyada si xun ula dhaqanka xaruurta, inkastoo ay kaligeed dhici karto.



29. **Xad gudub dhanka galmada ah:** wuxuu laxariiraa kuqasbida ama kucadaadinta ilmo ama qof da'yar inuu qayb kanoqdo falal galmo ah, ayadoon laga fiirin inay kujirto rabshad, ayadoon laga eegayn in ilmuhu ogyahay waxa dhacaaya. Falalka waxaa kujiri kara taabasho jireed, ayna kujirto weerar laxariira in ilmaha wax lagasho (tusaale ahaan kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn wax galinta sida siigaysiga, shuinta, istiiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo fiirsashada, ama soosaarista, sawirku galmo ah, daawashada muuqaalada galmada, kudhiiri galinta caruurta inay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xad gudub ugu samayso. Xad gudubka galmada ayaa kadhici kara khadka oonleenka, farsamada casriga ah ayaana loo adeegsan karaa fududaynta xad gudub aan oonleen ahayn. Xad gudubka galmadu maaha mid ay kaliya sameeyaan rag waawayn. Haweenka ayaa sidoo kale gali kara xad gudub galmo, si lamid ah sida ay usamayn karaan caruurta kale. Xad gudubka galmada ee caruurta iskugaystaan dhexdooda ayaa ah cilad gaar ah oo ilaalinta badqabka ah (sidoo kalena loo yaqaano xadgudubka carruurta u gaysato carruurta kale) oo ka jirta waxbarashada **dhammaan** shaqaaluhuna waa inay ka warqabaan laguna cadeeyaa xeerka dugsigooda ama kuleejkooda iyo habraacyada sidii arintaan xal loogu heli lahaa, (ka fiiri farqada 49).

30. **Dayacaada:** waa fashilka joogtada ah ee ku aadan buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee jireed iyo/ama maskaxeed ee caruurta, taasoo ay ubadan tahay inay abuurto naafo ba'an oo gaarta caafimaadka ama kobaca ilmaha. Dayaca ayaa dhici kara intay hooyadu uurka leedahay, tusaale ahaan, sabab laxariirta in hooyadu cabi jirtay waxyaabaha maandooriyaasha ah. Marka ilmuhu dhasho, dayacaada ayaa noqon karta mid katimid waalid ama daryeele kufashilma inuu: uu siiyo ilmaha cunto kufilan, dhar iyo hooy (ayna kujiraan in ilmaha laga saaro guriga ama la iskaxooro); inuu kadifaaco ilmaha dhibaataada ama khatarta jireed iyo mida dareenka; inuu xaqiijiyo kawarqabid kufilan (ayna kujirto adeegsiga daryeelayaal aan ilmaha baahiyihiisa kufilnayn); ama inuu xaqiijiyo helitaanka daryeelka caafimaad ama daawada kuhaboon imaha. Waxaa sidoo kale kujiri kara dayacaada, ama inaan qofku kajawaabi karin, baahiyaha aasaasiga ah ee dareenka ilmaha.

## Arimaha ilaalinta ilmaha

31. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay kwarqabaan arimaha ilaalinta kuwaasoo ilmaha galin kara halis ah in dhibaato gaarto. Habdhaqannada la xariira arimaha sida daroogo cunista iyo ama si khaldan u isticmaalka khamriga, si kas ah in loogu gooyo dugsigu iyo wadaagista dhinacyadu ku heshiiyaan ama aysan ku heshiin ee sawirada qaawan ama qayb ahaan qaawan iyo/ama muuqaallada<sup>6</sup> ayaa calaamado u noqon kara in carruurta ku jiraan khatar. Ciladaha kale ee la xariira ilaalinta badqabka ee ay tahay in shaqaalaha oo dhan ka warqabaan waxaa kamid ah:

## Ka faa'iidsiga La xariira Galmada (CSE) iyo U adeegsiga Ilmaha Fal Danbiyeed (CCE)

32. Labadaba CSE iyo CCE waa qaabab xadgudub oo dhaca marka qof ama koox ay ka faa'iidaystaan kala saraynta awooda si ay ugu qasbaan, u marin habaabiyaan

---

<sup>6</sup> Wadaagista dhinacyadu isla aqbaleen ee sawirada, gaar ahaan kuwa ay wadaagaan carruurta roon-roon ee isku da'da ah, ayaa u baahan karta jawaab gaar ah. Waxaa laga yaabaa inaysan ahayn xadgudub – laakiin carruurta waa inay wali ogaadaan inay tahay sharci daro- halka wadaagista aan qofka kale ogolaan ay tahay sharci daro iyo xadgudub. [UKCIS](#) wxay talo faahfaahsan ka bixinaysaa wadaagista sawirada iyo muuqaallada qaawan ama qayb ahaan qaawan.

ama u khiyaameeyaan ilmo si uu uga qaybgalo fal galmo ama danbi, si uu ugu badasho wax dhibanuhu u baahan yahay ama doonaayo, iyo/ama faa'iidada dhaqaalaha ama darajo kordhinta diyaariyaha ama fududeeyaha iyo/ama si xoog ah ama hanjabaad xoog u sheegasho ah. CSE iyo CCE ayaa saamayn kara carruurta, lab iyo dhedig ba waxaana ku jiri kara carruurta lasoo dhoofiyay (oo caadiyan loogu yeero dad dhoofin) si looga faa'iidayso.

### **Uga faa'iidaysiga Carruurta Falalka Danbiga ah (CCE)**

33. Qaar kamid ah qaababka gaarka ah ee CCE waxaa ku jiri kara carruurta in Igu qasbo ama lagu khaldo qaadista daroogooyink ama lacagta ayadoo la adeegsanaayo laymanka degmada, in laga shaqaalaysiiyo warshadaha daroogada, dukaan qaadista ama jeeb siibka. Waxaa sidoo kale lagu qasbi karaa ama lagu dagi karaa inay galaan fal danbiyeedka gaariyaasha ama ku hanjabida/samaynta rabshad xun oo ka dhan ah dadka kale.

34. Carruurta waxaa carqalad ku noqon kara noocan ka faa'iidaysiga ah maadaama dadka falka soo abaabulay ay ugu hanjabi karaan dhibanayaasha (iyo qoysaskooda) rabshad, ama gelinaaya ama ku qasbaaya inay galaan dayn. Waxaa lagu qasbi karaa inay qaadaan hub sida mindiyo ma inay bilaabaan qaadashada mindi si ay u siiso dareen difaac ay ka helaan wayeelo kasoo gaarta dadka kale. Ayadoo carruurta qaybta ka ah ka faa'iidaysiga fal danbiyeedyada ay badanaa galaan danbiyo, nugaylkooda ka dhibanayaal ahaan maaha wax markasta ay aqoonsadaan dadka waawayn iyo xirfadlayaashu, (gaar ahaana carruurta roon-roon), loolamana dhaqmo iny yihiin dhibanayaal inkastoo ay waxyeelo ku dhacayso. Wali waxaa looga faa'iidaysan karaa fal danbiyeedyada xataa haddii falku u muuqdo wax ilmuhu aqbaleen ama ay doonayaan.

35. Waa muhiim in la ogaado in khibrada ay maraan gabdhaha falalka danbiga loo adeegsaday ay aad uga duwanaa karto wiilasha. Calaamadaha ayaa kala duwanaa kara, hase yeeshee xirfadlayaashu waa inay ogaadaan in gabdhaha loo adeegsan karo falalka danbiga sidoo kale. Sidoo kale waa muhiim inay ogaadaan in labadaba wiilasha iyo gabdhaha loo adeegsaday fal danbiyeedku y khatar dheeraad ah ugu jiran in looga faa'iidaysto falalka galmada.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan CCE ayna ku jiraan qeexitaannada iyo calaamadaha ayaa ku jira Nuqulka.

### **Uga faa'iidaysiga Carruurta Falalka galmada ah (CSE)**

36. CSE waa qaab kamid ah xadgudubka galmada ilmaha. Xadgudubka galmada waxaa kujiri kara taabasho jireed, ayna kujirto weerar laxariira in ilmaha wax lagasho (tusaale ahaan kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn wax galinta sida siigaysiga, shuinta, istiiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo samaynta sawirada galmada, ku qasbida ilmaha inay fiirshaan sawirada galmada ama ay daawadaan muuqaallada galmada, kudhiiri galinta caruurta inay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xad gudub ugu sameeyaan ayna ku jirto kan dhanka interneedka.

37. CSE ayaa dhici kara muddo dheer ama dhici kara halmar, wuxuuna dhici karaa ayadoon ilmuhu markii hore ogayn tusaale uu ku ogaado dad kale oo muuqaalo ama sawiro ugusoo diraaaya baraha bulshada.

38. CSE ayaa saamayn kara cunug kasta, kaasoo lagu qasbay samaynta falalka galmada. Tan waxaa ku jira carruurta 16 iyo 17 jirada ah ee sharciyan aqbala in galmo lala sameeyo. Carruurta qaar ayaan ogaan karin in fal galmo looga faa'iidaystay tusaale waxay aaminsan yihiin inuu yahay xariir wanaagsan oo jacayl.

39. Xog dheeraad ah oo ku saabsan CSE ayna ku jiraan qeexitaannada iyo calaamadaha ayaa ku jira Nuqulka.

### Gudniinta Gabdhaha ee Fircooniga ah (FGM)

40. Inkastoo ay tahay in **dhamaan** shaqaaluhu kala hadlaan hogaanka uxilsaaran ilaalinta caruurta (ama kuxigeenkiisa) wixii kusaabsan walaacyada dhanka gudniinka gabdhaha (FGM), hadana waxaa **waajib sharci oo gaar ah kasaaran yahay macalimiinta**.<sup>7</sup> Hadii macalin, asagoo kujira shaqada xirfadiisa, uu ogaado in talaabo dhanka FGM ka ah lagu sameeyay gabar kayar da'da 18 sano jir, macalinka waxaa **qasab ku ah** inuu arintaan kuwargaliyo booliiska. Kafiiri Liiska A wixii faahfaahin dheeraad ah.

### Caafimaadka Dhimirka

41. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay ka warqabaan in dhibaatooyinka caafimaadka dhimirku ay, mararka qaar, noqon karaan calaamad muujinaysa in cunug uu la ildaran yahay ama khatar ugu jiro inuu la ildarnaado xadgudub, dayacaad ama ka faa'iidayso lagu sameeyay.

42. Kaliya shaqaalaha sida saxda ah loo tababaray ayay tahay inay isku dayaan baarida cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah. Hase yeeshee, shaqaalaha waxbarashadu, waxay fursad fiican u haystaan inay la socdaan carruurta maalin kasta ayna aqoonsadaan ilmaha dabeecadiisu muujinayso inuu waajahaayo cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah ama khatar ugu jiro inuu cilad waajaho.

43. Haddii carruurta la ildaran yihiin xadgudub ama dayac, ama dhibaatooyin kale oo xun oo dhimirka kasoo gaaray carruurnimadood, arintaan waxay ku reebi kartaa saamayn ma harto ah carruurnimadooda oo dhan, markay kuray noqdaan iyo markay dad waawayn noqdaan. Waa muhiim in shaqaaluhu ka warqabaan sida waxyaabaha ay soo maraan carruurtaad, ay saamayn ugu leedahay caafimaadkooda dhimirka, habdhaqanka iyo waxbarashada.

44. Dugsiyada iyo kuleejyada ayaa heli kara talooyin badan oo ka caawinaaya aqoonsiga carruurta u baahan taageerada dheeraadka ah ee caafimaadka Maskaxda, tan waxaa ku jira la shaqaynta wakaalado dugsiya ka baxsan. Xog dheeraad ah ayaa laga heli karaa [mental health and behaviour in schools guidance \(tasmada caafimaadka dhimirka iyo habdhaqanka ee dugsiyada\)](#), kuleejyada ayaa sidoo kale raaci kara tasmadaan oo ah habka ugu wanaagsan. Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Ingiriiska ayaa soo saartay tiro khayraad ah si loogu taageero macalimiinta dugsiya si ay kor ugu qaadaan caafimaadka wanaagsan, faya qabka iyo kartida carruurta. Ka fiiri [Rise Above \(Hormar Samee\)](#) lifaaqyo aad ka helayso dhammaan agabka iyo qorshayaasha casharka.

45. Haddii shaqaaluhu walaac caafimaadka dhimirka ah ka qabaan cunug taasoo sidoo kale walaac dhanka badqabka ah, talaabo degdeg ah waa in la qaadaa, ayagoo raacaaya xeerkooda difaaca carruurta ayna la hadlaan hogaanka badbaadada ee ku shaqada leh ama ku xigeenkiisa.

---

<sup>7</sup> Sida kucad Qaybta 5B(11) (a) ee Sharciga Gudniinka Gabdhaha 2003, "macalin" waxaa laga wadaa, marka laga firsho sharciga England, qof kujira farqada 141A(1) ee Sharciga Waxbarashada 2002 (shaqsiyaadka loo shaqaalaysiiyay ama qaybta ka ah fulinta shaqada macalinimada oo ay wax kubaraan dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarasho ee kuyaala England).

## Xad gudub caruurto iskugaystaan dhexdooda (ilmo ku xad gudbaaya ilmo kale)

46. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay kawarqabaan in caruurto ku xadgudbi karaan caruurta kale (taasoo inta badan loogu yeero ilmo kuxad gudbaaya ilmo kale). Taasina waxay ka dhici kartaa labadaba gudaha iyo banaanka dugsiga ama kuleejka iyo oonleenta. Waa muhiim in dhammaan shaqaaluhu aqoonsadaan calaamadaha iyo ishaaroyinka muujinaaya xad gudub caruurto iskugaystaan dhexdooda ayna yaqaanaan sida ay ku aqoonsanayaan ugana falcelinayaan warbixinnada.

47. Dhammaan shaqaaluhu waa inay fahmaan, in xataa haddii aysan jirin warbixinnada loosoo gudbiyo dugsiyadooda ama kuleejyada kama dhigna inaysan ahayn wax dhacaaya, waxaa laga yaabaa inaan keliya cidna soo sheegin. Sidaas awgeed waa muhiim haddii shaqaaluhu **wax** walaacyo ah ka qabaan xad gudub caruurto iskugaystaan dhexdooda inay la hadlaan madaxa u xilsaaran dhawrista badqabka (ama ku xigeenkiisa).

48. Waa muhiim in **dhammaan** shaqaaluhu fahmaan muhiimada habdhaqannada qalafsan ee khaldan ee u dhexeeya carruurta isku faca ah, kuwaasoo qaar badan oo kamid ah hoos lagu qoray, kuwaasoo dhab ahaantii ah xadgudub. Iska indho irista habdhaqannada qaar, tusaale iska indho tirista dhibaataynta galmoo lagasoo qaado "keliya kaftan", "keliya shactiro", "qayb kamid ah koriimada" ama "wiil markasta waa wiil" ay abuurayso caadi ka dhigista habdhaqanno aan la aqbali karin, goob aan badqab u lahayn carruurta mararka ugu xunna dhaqan caadi ka dhigaaya xadgudubka taasoo keenaysa in carruurto u qaataan wax caadi ah aysana ku dhiiran inay soo sheegaan.

49. Xadgudubka carruurto isku gaystaan dhexdooda waxaa badanaa kujiri kara, laakiin kuma koobna:

- Dhibaataynta (ayna ku jirto dhibaataynta interneedka, dhibaataynta ku salaysan fikirka qaldan iyo takoorka);
- Xadgudub ka jira xariir galmo oo u dhexeeya ilmaha isku faca ah;
- Xad gudubka jirka sida wax kudhufashada, laad kudhufashada, hantaaturaynta, qaniinyada, timo jiidka, ama hadii kale dhibaato jirka ah (tan waxaa ku jiri kara wax oonleenta ah kaasoo fududdeeya, khatar gelinaaya iyo/ama dhiiri gelinaaya xad gudub jireed);
- Rabshad galmo,<sup>8</sup> sida kufsiga, weerarka wax galinta ama weerarka galmo; (tan waxaa ku jiri kara wax oonleenta ah kaasoo fududdeeya, khatar gelinaaya iyo/ama dhiiri gelinaaya xad gudub jireed);
- dhibaataynta dhanka galmada,<sup>9</sup> sida fikradaha galmada laxariira, hadalka, kaftanada iyo dhibaataynta galmada ee oonleenta la isku mariyo, taasoo noqon karta mid kaligeed dhacda ama qayb ka ah taxane balaaran oo xad gudub ah;
- Ku qasbida qof inuu sameeyo fal galmo asagoon ogolaan, sida ku qasbida qof inuu niikiyo, uu iskiisa qaab istiimin ah u salaaxo, ama uu la sameeyo fal galmo qof sadexaad;
- Wadaagista lagu heshiiyay iyo tan aan lagu heshiin ee sawirada iyo/amama muuqaallada qaawan ama qayb ahaan qaawan<sup>10</sup> (oo sidoo kale loogu yeero fariimaha galmada ama sawirada galmada ee carruurto samayso);

---

<sup>8</sup> Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira rabshada galmada kafiiri Liiska A.

<sup>9</sup> Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira dhibaataynta galmada kafiiri Liiska A.

<sup>10</sup> Tasmada UKCIS: [Sharing nudes and semi-nudes advice for education settings \(Tallada wadaagista sawirada qaawan ama qayb ahaan qaawan marka la joogo xarumaha waxbarashada\)](#)

- qaadista sawiro aan loo fasixin,<sup>11</sup> kuwaasoo ay caadiyan kujiraan in qofku sawir kaqaato hoosta maryaha qofka kale asagoon qofka laga qaaday sawirku ayagoon ogolaansho laga qaadan, ujeedaduna tahay in la arko xubnaha taranka ee qofka ama baridiisa si markaas dareen galmo loogu adeegsado, ama qofka sawirka laga qaaday loogu ceebeeyo, looga nixiyo ama cabis loogu abuurto; iyo
- Abuurista/bilaabida nooc rabshad ama saansaanteeda (tan waxaa ku jiri kara falalka la xariira dhibaataaynta, xadgudubka ama bahdilaada loo adeegsado qaab qofka loogusoo daro koox waxaana sidoo kale ku jiri kara waxyaabaha oonleenka ah).

50. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay sifiican u yaqaanaan xeerarka iyo habraacyada udagsan dugsiga iyo kuleejka ee laxariira xadgudubyada ay caruurto dhexdooda iskugaystaan iyo doorka muhiimka ah ee ay ka ciyaaraan kahortageeda iyo ka jawaabida marka ay isleeyihiin ilmo ayaa khatar kasoo gaaraysaa.

## Rabshad daran

51. **Dhamaan** shaqaaluhu waa inay yaqaanaan waxyaabaha keenaaya, kuwaasoo muujin kara in caruurto ay kujiraan nooc halis ah, ama ay qayb kayihiin fal danbiyeed rabshad ah oo daran. Waxaa falalkaan kujiri kara inay si siikordhaysa ugu googooyaan dugsiga, isbadal kudhaca saaxiibadooda ama xariirtada ay laleeyihiin dadka waawayn iyo kooxaha, hoos udhac wayn oo kudhaca dadaalkooda, astaamo muujinaaya inuu ilmuhu naftiisa dhibaataaynaayo ama isbadal wayn oo kudhaca faya qabkiisa, ama astaamo muujinaaya weerar ama dhaawacyo aan la' aqoon. Hadiyado aan lasharxi karin ama inay ilmuhu haystaan waxyaabo cusub ayaa sidoo kale muujin kara in caruurta ay xariir lasoo sameeyeen, ama ay qayb kayihiin, shaqsiyaad kamid ah ururada danbiyada kukaca ama kooxo burcad ah waxayna khatar ugu jiri karaan in looga faa'iidayso falal danbiyeed (arag farqadaha 33-35).

52. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay ogaadaan tirada kaladuwan ee sababah hatarta ee kordhin kara suuragalnimada ka qayb ahaanshaha rabshad xun, sida ahaanshaha lab, in ilmuhu marar badan ka maqnaa dugsiga ama uu gabi ahaanba iskaga tagay dugsiga, in ilmuhu soo maray dacadaro badan uuna qayb ka ahaa xadgudub, sida xatooyo ama boob. Talo ku aadan dugsiyada iyo kuleejyada ayaa lagu bixiyaa Xaafiiska Dhexe ee [Preventing youth violence and gang involvement \(Kahortaga rabshada dhalinta iyo kaqayb noqoshadooda kooxaha burcada ah\)](#) tismadeeda [Criminal exploitation of children and vulnerable adults: county lines \(Ku sasabashada caruurta iyo dadka waawayn ee nugul fal danbiyeed: laymanka lagasoo wacaayo degmada\)](#)<sup>12</sup>.

## mACLUUMAAD DHEERI AH IYO TAAGEERO

53. Talada waaxda [What to Do if You Are Worried a Child is Being Abused - Advice for Practitioners \(Waxa ay tahay Inaad samayso Hadii aad Walaac Kaqabto in Ilmo Lagu Xad gudbay - Talada Dadka ilmaha u adeegaya\)](#) ayaa kusiinaysa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan fahanka iyo aqoonsiga xad gudubka iyo dayacaada. Tusaalayaasha waxyaabaha ay ubadan tahay inay muujiyaan xad gudub iyo dayacaad ayaa si kooban loogu sheegay dhamaan talada waxayna si gaar ah ucaawinayaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejka. Webseetka [NSPCC](#) ayaad sidoo kale kahelaysaa macluumaad dheeri ah oo muhiim ah oo laxariira xad gudubka iyo dayacaada iyo astaamaha aad raadinayso.

<sup>11</sup> Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira 'sawir qaadista sirta ah' kafiiri Nuqulka A.

<sup>12</sup> Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan laymanka degmada kafiiri Nuqulka A.

54. **Nuqulka A** waxaa kujira macluumaad dheeri ah oo muhiim ah kuna saabsan noocyada gaarka ah ee xad gudubka iyo arimaha laxariira amaanka ilmaha. Hogaamiyaasha dugsiga iyo kuleejka iyo shaqaalaha sida tooska ah ugu shaqeeya caruurta waa inay akhriyaan liiska.

## **Waxa ay samaynaayan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku haday walaacyo kaqabaan ilmo**

55. Shaqaalaha u adeegaaya caruurta waxaa lagu boorinayaa inay diirada saaraan fikirka ah '**way kadhici kartaa halkaan**' marka arintu laxariirto amaanka ilmaha. Markay walaac kaqabaan badqabka ilmo, shaqaaluhu waa inay markasta qaadaan talaabada **ugu haboon** ee maslaxada ilmuhu kujirto.

56. Hadii shaqaaluhu **wax walaaca** kaqabaan badqabka ilmaha, waa inay talaabo **degdeg ah kaqadaan**. Kafiiri bogga 23 shaxda isku aadka ah taasoo sheegaysa hanaanka ay racayaan shaqaaluhu marka ay walaac kaqabaan ilmo.

57. Hadii shaqaaluhu walaac qabaan, waa inay raacaan xeerka difaaca ee ururkooda ayna arinta usheegaan hogaamiyaha loo xilsaaray badbaadada ilmaha (ama kuxigeenka).

58. Dookhyada ayaa intaas kadib noqon kara:

- maaraynta taageero kasta oo cunuga lasiinaayo si hoose ayadoo laraacaayo maamuuska hanaanada taageero bixinta ee dugsiga ama kuleejka;
- Samaynta qiimaynta caawimaada hore;<sup>13</sup> ama
- wargalin loodiyo adeegyada sharciga ah,<sup>14</sup> tusaale ahaan marka ilmuhu baahi qabo, uu baahi kujiro ama la ildaran yahay ama ay ubadan tahay inuu ladhibaatoonaayo khatar kudhacday.

59. Hogaanka uxilsaaran ilaalinta ama kuxigeenkiisa ayaa laga rabaa inay markasta diyaar uyihiin kahadalka walaacyada dhanka amaanka. Hadii marka ay jiraan xaalado gaar ah, uusan hogaanka uxilsaaran ilaalinta (ama kuxigeenku) uusan joogin, arintaan maqnaanshihiisu waa inay daahin talaabo sax ah oo ay tahay in laqaado. Shaqaaluhu waa inay lahadlaan xubin katirsan kooxda hogaanka sare iyo/ama ay talo kadoontaan daryeelka arimaha bulshada ee caruurta ee maxaliga ah. Markay xaaladahaan yimaadaan, talaabo kasta oo laqaado waa in lala wadaagaa hogaanka uxilsaaran ilaalinta (ama kuxigeenka) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

60. Shaqaaluhu waa inay kafakarin in xubin shaqalaaha kamid ah ama xirfadle kale uu qaado talaabo uuna lawadaago macluumaad muhiim u ah badbaadinta nolosha caruurta. Waa inay niyada ku hayaan in wadaagista xogta xili hore ay muhiim u tahay

---

<sup>13</sup> Macluumaad dheeri ah oo kusaabsan qiimaynta caawimaada hore, bixinta adeegyada caawimaada hore iyo helitaanka adeegyada ayaad kahelaysaa Cutubka 1 ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#).

<sup>14</sup> Cutubka 1 ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#) ayaa qeexaaya in iskaashatada qaybta ka ah ilaalinta caruurta ay daabacaan dukumiinti tilmaamo ah taasoo ay tahay inay kujiraan shuruudada, oo ay kujiraan heerka baahida, ee marka kiiska loo gudbinaayo dawlada deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee caruurta si loosameeyo qiimaynta iyo adeegyada sharciga ah ee kucad farqadaha 17 iyo 47. Sarakiisha dawlada deegaanka, oo kaashanaaya iskaashatadooda, waa inay abuuraan ayna soo dhajiyaan maamus maxali ah oo lagu samaynaayo qiimaynta. Maamuuska maxaliga ah waa inuu dajiyaa nidaamyo qeexan oo ku aadan qaabka kiisaska loo maaraynayo marka ilmaha loosoo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee caruurta.

aqoonsiga, qiimaynta, iyo qoondaynta waxtarka leh ee bixinta adeegga ku haboon, hadday tani tahay marka koobaad ee ciladu soo muuqato, ama marka ilmo horay u yaqaaneen maamulka maxaliga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta (sida ilmo u baahan ama ilmo leh qorshaha difaaca). [Information Sharing \(Wadaagista Macluumaadka\): Advice for Practitioners Providing Safeguarding Services to Children, Young People, Parents and Carers \(Talo lasiinaayo Dadka ilmaha gacanta kuhaya ee Ilmaha Siinaaya Adeegyada Badbaadinta, Dadka da'yarta ah, Waalidiinta iyo Daryeelayaasha\)](#) ayaa taageero siinaaya shaqaalaha ay qasabka kutahay inay go'aan kaqaataan cida ay macluumaadka lawadaagayaan. Taladaan waxaa kujira todobada xeer ee muhiimka u ah wadaagista macluumaadka iyo kabaaraan dagisyada ku aadan Sharciga Difaaca Macluumaadka 2018 (DPA) iyo Xeerka Guud ee Difaaca Macluumaadka (UK GDPR). UK iyo GDPR kama hortagaan wadaagista xogta sababo la xariira dhawrista badqabka carruurta iyo hormarinta faya dhawrkooda. Hadii ay jiraan wax shaki ah oo ay kaqabaan la wadaagista macluumaadka cid kale, shaqaaluhu waa inay lahadlaan hogaanka u xilsaaran ilaalinta caruurta ama kuxigeenkiisa. Cabsiyada ku aadan faafinta macluumaadku **waa qasab inaan** loo ogolaan nay caqabad kunoqoto baahida looqabo ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta.

## Caawimaad hore

61. Hadii caawimaada hore ay tahay waxa haboon, hogaanka uxilsaaran ilaalinta (ama kuxigeenkiisa) ayaa caadiyan hogaaminaaya laxariirida wakaaladaha kale iyo diyaarinta qiimayn ay wakaaladuhu isla sameeyaan sida kuhaboon. Shaqaalaha waxaa laga don karaa inay taageeraan shaqaalaha kale iyo xirfadlayaasha kale inta lagu jiro qiimaynta caawimaada hore, ayagoo mararka qaar noqon kara hogaanka qiimaynta. Xaalad kasta oo noocaas ah waa in lagu ilaaliyaa dib u eegis joogto ah iyo kabaaraan dagis lagu samaynaayo wargalinta lasiinaayo daryeelka arimaha bulshada ee caruurta si ay qiimayn ugu sameeyaan adeegyada sharciga ah, hadii xaalada cunugu aysan umuuqan mid kasoo raynaysa aa ay kaba siidarayso.

## Qiimaynnada iyo adeegyada sharciga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta

62. Wlaacyada la xariira faya dhawrka ilmaha waa in loo gudbiyaa maamulka maxaliga ah ee daryeelka arimaha bulshada ee carruurta. Marka ilmuhu dhibaatoonaayo, ama ay ubadan tahay inuu la ildaran yahay dhibaato loo gaystay, waa muhiim in lagu wargaliyo daryeelka arimaha bulshada ee caruurta (iyo hadii ay sidaas haboon tahay booliiska) sida ugu dhakhsaha badan. Wargalinadu waa inay racaan hanaanka wargalinta ee maxaliga ah.

63. Qiimaynada lagu samaynaayo daryeelka bulsho ee caruurta waa in lagu fiiriyaa meelaha ilmaha dhibaataada loogu gaysto banaanka guriga, sidaas awgeed waxaa muhiim ah in dugsiyada iyo kuleejyadu ay baxshaan macluumaadka ugu badan ilaa inta macquulka ah oo qayb ka ah hanaanka wargalinta dhacdooyinka. Tani waxay usahlaysaa qiimayn kasta inay xisaabta kudarsato dhamaan cadaynta laheli karo waxayna fududaynaysaa qaab naqshadaysan oo loo xaliyo dhibaataadaas. Xog dheeraad ah ayaad ka helaysaa halkaan: [Contextual Safeguarding \(Ilaalinta Ilmaha kabaxsan Dugsiga\)](#).

64. Qalabka oonleenka ah [Report Child Abuse to Your Local Council \(Usheeg Xad gudubka Ilmaha lagula Kaco Golaha Degaankaaga\)](#) ayaa kusiinaaya nambarka aad kala xariirayso waaxda daryeelka arimaha bulshada ee caruurta ee maxaliga ah.

## Caruurta baahida qaba

65. Ilmo baahi qaba waxaa lagu qeexay Sharciga Caruurta ee 1989 inuu yahay ilmo ay ubadan tahay inuusan kuguulaysan karin ama haysan karin heerka macquulka ah ee

caafimaadka ama kobaca, ama caafimaadkiisa iyo kobaciisu ay ubadan tahay in si wayn ama si dheeri ah dhaawac usoo gaaro, hadaan lasiin adeegyada; ama ilmo naafo ah. Maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989.

### **Caruurta la ildaran ama ay ubadan tahay inay la ildarnaadaan dhibaato daran:**

66. Maamulka deegaanka, oo kaashanaaya ururada kale ee hawshaani qusayso, waxaa masuuliyad kasaaran tahay baaritaan kusameeyaan si waafaqsan farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989 haday hayaan cadayn macquul ah oo ay uga shakiyaan in ilmo yar xaalad xun kujiro, ama laga yaabo inuu la dhibtonaayo, dhibaato wayn. Xog aruurintaas ayaa u sahlaya inay go'aanshaan inay qaadaan iyo in kale wax talaabo ah si loo ilaaliyo badqabka loona hormariyo faya dhawrka ilmaha waana in loo sheegaa marka ay jiraan walaacyo la xariira ilmo la dac-dareeyay. Tan waxaa ku jira dhammaan noocyada xadgudubka iyo dayacaada, gudniinka gabdhaha, ama xadgudubka kale ee waxa loogu yeero 'sharaf dhawrka' ku salaysan, guurka qasabka ah iyo waxyeelooyinka dheeraadka ah ee qoysku gaaysto sida mayal adkaynta iyo uga faa'iidaysiga falalka galmada.

### **Maxay tahay inay sameeyaan maamulka deegaanku?**

67. Gudaha hal maalin marka lasoo gudbiyo wargalinta, shaqalaaha arimaha bulshada ee aamulka maxaliga ah waa inuu xaqiijiyaa helitaanka wargalinta uuna go'aan kagaaraa talaabooyinka xigga ee laqaadaayo iyo nooca jawaabta ee loo baaha yahay in labaxsho. Tan waxaa kujirta kago'aan gaarista in:

- ilmuhu ubaahan yahay difaac degdeg ah iyo talaabo degdeg ah oo loo baahn yahay;
- in wax adeegyo ah ay ubaahan yihiin ilmaha iyo qoysku iyo nooca adeegyada ay ubaahan yihiin;
- in ilmuhu baahi qabo, ayna tahay in qiimayn lagu sameeyo si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989. Cutubka kobaad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta\)](#) ayaa faahfaahin kabixinaaya hanaanka qiimaynta;
- in ay jirto sabab macquul ah oo looga shakin karo in ilmuhu la ildaran yahay ama ay ubadan tahay inuu ladaalaa dhacaayo dhibaato wayn, iyo in baaritaano ay qasab tahay in lagu sameeyo cunuga lagu qiimeeyo si waafaqsan farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989. Cutubka kobaad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta\)](#) ayaa faahfaahin kabixinaaya hanaanka qiimaynta; iyo
- in qiimaynada dheeriga ah ee taqasuska leh loo baahan yahay si looga caawiyo maamulka deegaanka go'aaminta nooca talaabada dheeriga ah ee laqaadayo;

68. Wargalinta waa in daba gal lagu sameeyaa hadii macluumaadkaan uu yahay mid biloow ah.

69. Hadii shaqaalaha arimaha bulshadu go'aamiyaan samaynta qiimaynta sharciga ah, waa in shaqaaluhu sameeyaan waxkasta ooy awoodaan si ay utaageeraan qiimayntaas (oo uu taageeraayo hogaanka uxilsaaran ilaalinta caruurta (ama kuxigeenkiisa) hadii loobaahdo).

70. Hadii, kadib wargalinta, xaalada ilmuhu aysan umuuqan mid kasoo raynaysa, wargalintu waa inay martaa habraacyada soosocda ee sii balaarinta qadiyada maxaliga ah si loo hubiyo in walaacyada laxaliyo lana, sida ugu muhiimsan, kor looqaado xaalada ilmaha.



## Ilaalinta diiwanaka

71. **Dhamaan** walaacyada, doodaha iyo go'aanada lagaaro, iyo sababaha go'aanadaas loo cuskado, waa in ayagoo qoran diiwaanka lagashaa. Xogtu waa inay ahaataa mid qarsoodi ah meel amaan ahna lagu kaydiyaa. Waa dhaqan wanaagsan in walaacyada iyo soo jeedinnada lagu hayo qayb gaar ah oo galka difaaca ilmaha ah cunug kasta.

Diiwaannada waa in lagu daraa:

- Xogta kooban ee qeexan oo la fahmi akro ee walaaca;
- Faahfaahinta sida walaaca dabagal loogu sameeyo iyo sida loo xaliyay;
- Cadaynta talaabo kasta oo la qaaday, go'aannada la gaaray iyo natiijada.

72. Hadii ay walaacyo kaqabaan shuruudaha diiwaan haynta, shaqaaluhu waa inay arintaas kala hadlaan hogaanka uxilsaaran ilaalinta (ama kuxigeenkiisa).

## Maxay arimahaan dhan muhiim uyihiin?

73. Waa muhiim in caruurta helaan caawimaada saxda ah xiliga kuhaboon si looga hortago halisaha ilaalinta badqabka, loogana difaaco arimaha ugasii dari kara halisaha jira iyo hormarinta faya dhawrka ilmaha. Daraasad iyo baaritaano daran oo lagu sameeyay kiisaska ayaa si joogto ah umuujiinaaya khataraha ka imaanaaya inaan laqaadin talaabo waxtar leh.<sup>15</sup> Macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan dib u eegisyada kiisaska adag ayaa laga heli karaa Cutubka afraad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta\)](#). Tusaalayaasha talaabooyinka daciifka ah waxaa kujira:

- kufashilmida talaabo kaqadista ama wargalinta astaamaha hore ee xad gudubka iyo dayacaada;
- diiwaan haynta daciifka ah;
- kufashilmida dhagaysiga fikradaha ilmuhu sheegayo;
- Kufashilmida dib uqiimaynta walaacyada marka aan xaalada jirta kasoo raynayn;
- Inaan lala wadagain xogta dadka saxda ah ee gudaha xarunta iyo wakaaladaha;
- in aad macluumaad ula wadaagto cida ay uqsayso si aad gaabis u ah; iyo
- inaad ku cadaadin dadka umuuqda inaysan qaadayn talaabadii loobaahnaa.

## Waxa ay samaynayaan shaqaalaha dugsiga iyo kuleejku haday walaacyo kaqabaan ilaalinta badqabka ee shaqaale kale.

74. Dugsiyada iyo kuleejyadu waa inay lahaadaan qorshayaasha iyo habraacyada u diyaarsan si ay u maareeyaan walaacyada ilaalinta badqabka ee la xariira shaqaalaha (ayna ku jiraan shaqaalaha adeegyada, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha). Hadii shaqaaluhu walaacyo dhanka badqabka ah qabaan, ama eedaymo loosoo jeedsho

---

<sup>15</sup> Qiimaynta dib u eegisyada kiisaska daran ayaad kahelaysaa barta [gov.uk/government/publications/analysis-of-serious-case-reviews-2014-to-2017](http://gov.uk/government/publications/analysis-of-serious-case-reviews-2014-to-2017).

xubin kale oo shaqaalaha kamid ah (ayna kujiraan shaqaalaha, mutadawiciinta, iyo qandaraaslayaasha agabka) oo halis dhibaato ah ku abuuraaya caruurta, markaas:

- waa in arintaan lagu wargaliyaa madaxa dugsiga ama maamulaha;
- markay jiraan walaacyo/eedaymo laxariira madaxa macalimiinta ama maamulaha, waa in arintaan lagu wargaliyaa hogaanka maamulayaasha, hogaanka gudigga maamulka ama mulkiilaha dugsiga gaarka looleeyahay; iyo
- Marka ay jiraan walaacyo/eedaymo la xariira maamulaha dugsiga, haddii maamulaha dugsigu sidoo kale yahay mulkiilaha keliya ama uu maamulo dugsi madax banaan, ama xaalad marka ay jirto masaalix iska hor imaanaysa oo ku jirta soo sheegista arinta maamulaha dugsiga, waa in walaacaan toos loogu diraa maamulaha maamulka maxaliga ah ee u xisaaran arinta (LADO). Faahfaahinta LADO ga deegaankaaga ayaa si fudud looga heli karaa webseedka maamulka deegaankaaga.

Xog dheeri ah waxaa laga heli karaa Qaybta afraad ee tasmadaan.

## **Waxa ay tahay inay sameeyaan shaqaalaha dugsiga ama kuleejka haday walaacyo kaqabaan xeerarka ilaalinta caruurta ee kajira dugsiga ama kuleejka**

75. Dhamaan shaqaalaha iyo mutadawiciintu waa inay dareemaan inay awoodaan sheegista walaacyada laxariira farsamo daciif ah ama aan badbaado lahayn iyo fashilo kadhalaan kara hananaka ilaalinta caruurta ee dugsiga ama kuleejka, ayna ogaadaan in walaacyada noocaas ah looqaato kuwo halis ah ayna gaarsiyaan madaxda sare ee kooxda.

76. Habraacyo lagu qarxin karo walaacyada noocaas ah oo haboon waa in ladajiyaa si loogu sheego madaxda sare ee kooxda hogaanka dugsiga ama kuleejka.


77. Marka xubin kamid ah shaqaaluhu uu dareemo inuusan awoodin sheegista khatar ka imaanaysa qofka ay ushaqeeyaan, ama uu dareemaayo in walaacyadiisa rasmiga ah aan waxba laga qabanayn, marino kale oo ay arinta kusoo gudbin karaan ayaa u furan:

- Tilmaanta guud ee qarxinta walaaca ayaa laga heli karaa: [Advice on Whistleblowing \(Talada ku aadan Sheegista walaaca\)](#)
- [NSPCC's what you can do to report abuse dedicated helpline \(Laynka loo asteeyay caawimaada ee NSPCC ee waxa aad samayn karto si aad usoo sheegto xad gudub\)](#) ayaad heli kartaa ayadoo ah qaab kale oo shaqaalaha aan u arag inay awoodaan inay walaacyada laxariira fashilka ku aadan difaaca caruurta soo gudbin karaan gudaha xarunta ama walaacyada kaqaba qaabka walaac uu umaareeyo dugsigooda ama kuleejkoodu. Shaqaaluhu waxay wici karaan 0800 028 0285 – laynka ayaa laheli karaa laga bilaabo 8:00 AM ilaa 8:00 PM, Isniinta ilaa Jamcada iyo khadka imeelka: [help@nspcc.org.uk](mailto:help@nspcc.org.uk).<sup>16</sup>

---

<sup>16</sup> Taas badalkeeda, shaqaaluhu waxay qoraal udiri karaan: National Society for the Prevention of Cruelty to Children (NSPCC, Ururka Qaran ee Kahortaga Dhibaataada loogaysto Caruurta), Weston House, 42 Curtain, Road, London EC2A 3NH.

# Talaabooyin ku aadan meelaha ay kajiraan walaacyada laxariira ilmo yar



<sup>1</sup> Marka ay sidoo kale laxariirto walaac ama eedayn xad gudub ama dayacaad uu gaystay xubin shaqalaaha kamid ah, kafiiri Qaybta Afraad ee tasmadaan.

<sup>2</sup> Caawimaad hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla marka dhibaataadu timaado xili kasta oo kamid ah noloshu ilmaha. In ilmuhu ka faa'iidayanaayo caawimaad hore oo la iska kaashaday, qiimaynta caawimaada hore ee wakaaladuhu iska kaashadaan waa in la sameeyaa. Cutubka kobaad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta\)](#) ayaa tusmo faahfaahsan kabixinaaya hanaanka caawimaada hore.

<sup>3</sup> Wargalinadu waa inay raacaan hanaanka udagsan ee kuqoran dukumiintiga tixraaca maxaliga ah iyo hab maamuuska qiimaynta ee maxaliga ah. Cutubka koobaad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta ilaalinta caruurta\)](#).

<sup>4</sup> kucad Sharciga Caruurta ee 1989, maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan farqada 17 ee Sharciga Caruurta 1989. Sida kucad farqada 47 ee Sharciga Caruurta 1989, marka maamulka maxaliga ah uu hayo sabab macquul ah oo ay uga shakin karaan in ilmo la dhibtoonaayo ama laga yaabo inuu khatar ugu jiro dhibaato wayn, waxaa masuuliyad kasaaran tahay inay samayso baaritaano si loo go'aansho in aan qaadayno talaabo si loo ilaalsho amaanka ilmaha korna loogu qado faya dhawrka ilmaha. Faahfaahin buuxda waxaad kahelaysaa cutubka koobaad ee [Working Together to Safeguard Children \(Kawada shaqaynta ilaalinta amaanka caruurta\)](#).

<sup>5</sup> Arintaan waxaa kujiri kara Dalbashada Amarka Difaaca Dedega (EPO).